

TALLAALAKA COVID-19

Waxaad u baahan tahay inaad ogaatid



22 Abriil 2021

Sidee bay u shaqeeyaan tallaalada COVID-19?

Tallaaladu waxay caawiyaan qofka jirkiisu inuu aqoonsado oo uu la dagaalamo bakteeriyada iyo fayrasyada sababi kara jiro daran.

Tallaaladu waa hab amaan ah oo uu ku soo saaro jirku jawaab difaac isagoon wax jiro ah sababin. Waxay xoojiyaan nidaamkaaga difaaca jirka iyagoo tababaraya jirkaagu inuu aqoonsado oo la dagaalamo fayrasyo iyo bakteeriyo khaas ah.

Tallaalada COVID-19:

- ✓ kama koobna COVID-19.
- ✓ kuma qaadsiiyayaan adiga COVID-19.
- ✓ ma bedeli doonaan jinsigaaga ama DNA -ga sinaba.
- ✓ kama koobna walxo xayawaan, hilib, ama ukun.

Tallaalka COVID-19 ku ma amaan baa?


Gudaha Australia, dhammaan tallaaladu waxay maraan tijaabo taxadar badan si loo hubiyo inay amaan iyo wax ku ool yihiin.

Khobarada Daawada ee Maamulka Alaabta Wax daaweynta Therapeutic Goods Administration (TGA) ayaa dhammaan tallaalada u jeegareeya si joogta ah oo taxadar leh iyagoo eegaya:

- cilmi barista sayniska
- macluumaadka ku saabsan sida tallaalku loo sameeyey
- macluumaad ku saabsan wixii dhibid ah.

Tallaalada COVID-19 prevent waxay ka hortagaan jirooyinka daran iyo dhimasho waxayna kaa caawinayaan inay ku ilaaliyaan adiga, qoyskaaga, iyo jaaliyadaada.

COVID-19 vaccines are safe



COVID-19
VACCINATION



North Richmond Community Health (Wulempuri-Kertheba) stands on the traditional lands of the Wurundjeri people. We pay our respects to their elders, past and present.

f @nrchAUS

nrch.com.au

03 9418 9800

Somali



north richmond
community health

Wulempuri - Kertheba

TALLAALAKA COVID-19

Waxaad u baahan tahay inaad ogaatid



22 Abriil 2021



Xaq ma u leedahay?


Yaa qaadan kara tallaalka COVID-19?

Qofkasta oo Australia gudaheeda joogaa wuxuu heli karaa tallaalka COVID-19 oo BILAASH ah wakhtigooda la gaaro.

Iskaan QR code ka ama booqo www.bit.ly/vaccineeligibilitychecker si aad u aragtid haddii aad xaq u leedahay tallaalka COVID-19.

Tallaalku ma Khasabaa?

Maya, tallaalku khasab ma ah.



Xaggee baan ka heli karaa tallaalada COVID-19?

North Richmond Community Health waxay ku faraxsan tahay inay kuu sheegto in naloo ogolaaday inaan noqono bixiyaha tallaalada AstraZeneca COVID-19.

Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo websaatkeena: www.nrch.com.au/coronavirus-covid-19

Ka waran haddii aanan heysan kaarka Medicare ka?

Haddii AADAN heysan karaka Medicare ka, waxaad ka heli kartaa tallaalkaaga rugta caafimaadka neefsashada ama rugta caafimaadka tallaalka ee territory-ga.

Iskaan QR code ka midigta ku yaal ama booqo www.bit.ly/respiratoryclinics si aad u aragto liiska rugaha caafimaadka rugaha caafimaadka ee aad booqan kartid si aad u heshid tallaalada COVID-19.



Liiska rugaha caafimaadkaneefsashada



North Richmond Community Health (Wulempuri-Kertheba) stands on the traditional lands of the Wurundjeri people. We pay our respects to their elders, past and present.

@nrchAUS

nrch.com.au

03 9418 9800


Somali



north richmond
community health
Wulempuri - Kertheba

TALLAALAKA COVID-19

Waxaad u baahan tahay inaad ogaatid



22 Abriil 2021

COVID-19 vaccines: What to expect



COVID-19
VACCINATION



Jeegareyaha waxyeelada
tallaalka COVID-19

Maxaan rajeyn karaa ka dib markaan qaato tallaalka COVID-19?

Ka dib markaad qaadato tallaalka kasta, waxaa laga yaabaa inaad isku aratid waxyeelo yar. Waxyeelada badidoodu waa wax fudud mana qaataan wax ka badan maalmo yar.

Waxyeelada caamka ah ka dib tallaalka COVID-19 waxaa ka mid ah:

- gacan xannuun
- madax xannuun
- xumad heekedu hooseeyo
- muruq xannuun
- qabow xannuun leh
- daal ama
- kala goysyo xannuun.

Haddii aad dhowaan qaadatay cirbadaadii koowaad ee tallaalka oo aad dareemayso dhibaad ka welwelsan tahay, ballan sameyso si aad dhakhtarkaaga u aragtid.

Iskaan QR code ka bidixda ku yaal ama booqo www.bit.ly/covid19vaccinesideeffectchecker si aad u jeegareyso waxyeelada.

Waa maxay waxyeelada tallaalka AstraZeneca COVID-19 ee qofwaliba ka hadlayo?

Waxaa jira xaalad dhif ah oo ah xinjirowga dhiiga (thrombosis with thrombocytopenia) oo la xiriiirta tallaalka AstraZeneca.

Khatarta aad tan ku yeelan kartid tan xinjirowga dhiiga ee dhifta ahi si aad ah ayey u yar tahay.




North Richmond Community Health (Wulempuri-Kertheba) stands on the traditional lands of the Wurundjeri people. We pay our respects to their elders, past and present.



@nrchAUS



nrch.com.au



03 9418 9800

Somali



north richmond
community health
Wulempuri - Kertheba

TALLAALAKA COVID-19

Waxaad u baahan tahay inaad ogaatid



22 Abriil 2021

Tallaalka AstraZeneca COVID-19 ku ma amaanbaa?

Haa. Tallaalku waa amaan wax ku ool ah oo ay faa'iidooyinku ka badan yihiin khatar kasta oo suurtagal ah.

Kooxda Ka talinta Farsamo ee Tallaalka Australia (ATAGI) waxay soo jeedinayaan in tallaalka AstraZeneca uu weli amaan u yahay in la siiyo jira 50 sanno iyo wixii ka weyn.

Waxaan u ballansanahay doosahii cirbadii ugu horeysay ee tallaalka AstraZeneca, maxaan sameeyaa?

Haddii aad ka hooseyso 50, tallaalka Pfizer COVID-19 ayaa lagugula talinayaa marka loo eego tallaalka AstraZeneca.

Xaaladaha qaarkood, dadka ka hooseeya 50 waxaa laga yaabaa in lagula taliyo inay qaataan tallaalka AstraZeneca haddii faa'iidooyinku ka bataan khataraha. Fadlan ka sameyso ballan dhakhtarkaaga si aad tan ugala hadashid.

Haddii aad jirto 50 ama aad ka weyn tahay, tallaalka AstraZeneca ayaa weli lagugula talinayaa.

Waxaan qaatay cirbadii ugu horeysay ee tallaalka AstraZeneca, maxaan hadda sameeyaa?

Haddii aad qaadatay cirbadii ugu horeysay ee tallaalka AstraZeneca, oo aadan arkin wax waxyeelo ah oo daran, waxaad qaadatay kartaa cirbada labaad. Fadlan ka sameyso ballantaada labaad rugtaada caafimaadka oo la hadal dhakhtarkaaga haddii ay jiraan waxaad saluugsan tahay.

Ma u baahan tahay macluumaad dheeraad ah?

Ka wac Khadka caafimaada Qaranka ee Coronavirus iyo COVID-19 1800 020 090.

Iskaan QR code ka midigta ku yaal ama booqo www.bit.ly/covid19vaccineinfo si aad ugu heshid macluumaadkii ugu danbeeyey luuqadaada.



Macluumaadka tallaalka COVID-19 oo luuqadaada ah




North Richmond Community Health (Wulempuri-Kertheba) stands on the traditional lands of the Wurundjeri people. We pay our respects to their elders, past and present.



@nrchAUS



nrch.com.au



03 9418 9800

Somali



north richmond
community health
Wulempuri - Kertheba